



BDS Translation and Interpretation Message in Notifications for Land Use Cases, Enforcement Cases, and Residential Demolitions

BDS Tarjumaadda iyo af celinta farriintan waxay ogaysiis u tahay. xaaladaha Istickmaalka dhulka, xaaladaha fulinta iyo duminta guryaha.

Si loo kordhiyo dedaalka loona hurumariyo helitaanka bulshadu u leedahay xaafiiska Hurumarinta Adeegyada (Bureau of Development Service), laga bilaabo bisha Febraayo 1, 2017, ogaysiisyada xaaladaha dib u eegista Istickmaalka dhulka, xaaladaha fulinta iyo duminta guryaha waxaa ku jiri doona warbixin ku saabsan sidii aad u codsan lahayd tarjumaad ama siyaabo kale oo baahidaada loo dabooli karo.

"Qof kasta oo ku nool ama ka shaqeeya Magaalada Portland waa daneeyayaasha Xafiiska Horumarinta Adeegyada" saas waxaa tidhi Rebecca Esau oo ah ku simaha madaxa Xafiiska BDS. " Waxaan doonaynaa inay dadku ogaadaan inay naga go'antahay sidii aan u kordhin lahayn helitaanka adeegyadayaada iyo inaan u fududayno dadka baahiyaha gaarka ah leh iyo tarjumaado aan u fidinno dadka aan Ingriisiga si fiican ugu hadalin." Iyada oo uu waajibiyay fulinta baahiyahan qodobka Labaad iyo Lixaad ee xeerka federaalka Xuuuqda madaniga, haddana halkan BDS waxay ka tahay qayb ka mid ah dedaalka ballaran ee lagu jiro, iyadoo la adeegsanaayo siyaabo kala duwan sidii loo hirgelin lahaa gaadhsiinta adeegyo siman, wacyi gelin iyo shaqo abuuris.

Dhammaan dib u eegista isticmaalka dhulka iyo xaaladaha fulinta ee BDS waxaa hadda ku jiri doona firriintan ogaysiiska ah ee "Tarjumaadda iyo Af-celinta" kow iyo toban luuqadood. BDS wuxuu sii wadi doonaa raadinta siyaabo kala duwan si loo kordhiyo helitaanka adeegyada xafiiska.

Traducción e interpretación | Chuyển Ngữ hoặc Phiên Dịch | 翻译或传译
Turjumida ama Fasiraadda | 翻訳または通訳 | Письменный или устный перевод
Traducere sau Interpretare | 번역 및 통역 | الترجمة التحريرية أو الشفوية
ການແປພາສາ ຫຼື ການອະທິບາຍ | Письмовый або усний переклад



503-823-7300



BDS@PortlandOregon.gov



www.PortlandOregon.gov/bds/translated

The City of Portland is committed to providing meaningful access.

For accommodations, modifications, translation, interpretation or other services, please call **503-823-7300**, the TTY at **503-823-6868** or the **Oregon Relay Service** at **711**.



City of Portland, Oregon | Bureau of Development Services | 1900 SW Fourth Avenue, Portland, Oregon 97201 | www.portlandoregon.gov/bds



Si aad u hesho Dhokomantiyo ku tarjuman Isbaanish, Fiitnaamiis iyo Ruush, iyo weliba luuqadaha kale ee magaalada booqo boggayaga [ee tarjumaadda luuqadaha](#).

waxii su'aalo ah? Ka soo wac telefoonka guud ee BDS (503)823-7300 ama ku soo dir farriin Elektaroonik ah BDS@portlandoregon.gov.